بسم الله الرحمن الرحيم

Buurta Jabalu Abuu Lahab\جبل أبي لهب

Maalin jimce

Maalinta jimce taariikhduna tahay kow iyo labaatanka bisha Muxarram**محرم** ee sanadka kun afar boqol saddex iyo soddon Hijriga una dhiganta lix iyo tobanka Disembar laba kun iyo kow iyo toban Miilaadiga, kaddib markaan salaadda Jimce iyo saladda casarba Xaramka Makkah Al Mukarramah**حرم مكة المكرمة** ku tukaday ayaan taxi raacay.

Waxaan ninka taxiga wada u sheegay inuu i geeyo xaafadda "Abuu Lahab**حي أبولهب**" igana geeyo meesha la yiraahdo "ziinatu al sayaaraati**زينة السيارات**" oo ku taalla buurta "Jabalu Abii Lahab**جبل أبو لهب**."

Wuxuu ii sheegay inuu meeshaas yaqaanno uuna iga qaadanayo shan iyo toban riyaal. Waxaan weydiiyay intay bartaasu Kacbada u jirto, wuxuuna ii sheegay inay masaafadaasu waagii hore dheeraan jirtay, haddase marka buuraha la dalooliyay oo hoostooda dariiqyo laga sameeyey ay masaafadii gaabatay, isaguna uu ku qiyaasayo ilaa saddex kiiloomitir iyo bar inay masaafadaasu hadda tahay.

Markaan bartaas tegay ayaan arkay inay "ziinatu al sayaaraati**زينة السيارات**" oo macneheedu yahay "quruxda baabuurta" uu yahay suuq wayn oo lagu gado qalabka baabuurta lagu qurxiyo iyo warshadaha lagu hagaajiyaba. Suuqaasna wuxuu ku yaalla buur wayn hoosteeda. Suuqaas waxaa dhanka buurtu uga taallo mooyee dhanka kale ag mara dariiq wayn oo ah midka Xaramka kasoo baxa oo taga Masjidu Caa'ishah/Al Tanciim**مسجد عائشة\التنعيم** meesha Cumrada looga soo ixraamto.

Waxaan dhex maray suuqaas anigoo raadinaya nin da' wayn oo sucuudi ah oo aan wax weydiiyo, waase ka waayay. Dada halkaas ka shaqeynayayba waxay wada ahaayeen ajaanib pakistaaniyiin ama dadka Aasiya ka yimid wada ah.

Waxaan arkay laba nin oo baabuur shirkiis ku dhex jira oo sameynaya, iilana ekaaday suudaaniyiin. Markaasaan labadaas u tegey, salaan kaddibna aan weydiiyay inay suudaaniyiin yihiin, ayaguna ay haa yiraahdeen.

Waxaan raggaas u sheegay magacayga iyo inaan soomaali u dhashay hadana aan maraykan ku noolahay iyo inaan danaynayo taariikhda, gaar ahaan siirada Nabiga Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, iyo inaan bartaas u imid anigoo doonaya warka Abuu Lahab**أبو لهب** oo kutubbadu dhigeen inuu buurtaan dhineceeda ku duugan yahay.
Waxaan kaloo weydiiyay inay buurtaanu tahay "Jabalu Abii Lahab**جبل أبي لهب**" ayaguna ay waa ayada yiraahdeen.

Labada nin kooda dhallinta yar ayaa xog ogaal sanaa wuxuuna yiri:

“anigu ilaa lix iyo toban sano ayaan halkaan ku noolahay waxaanna ka maqlay dadka beeshaan deggan inuu Abuu Lahab\أبولهب in badan ratigiisa gaadiidka u ahaa oo uu fuuli jiray buurtaan hoosteeda ku xiri jiray.”

Markaan weydiiyay sabtuu buurtaan hoosteeda ratigiisa ugu xiri jirayna wuxuu yiri:
“ma ogi waxaase dhici karta inuu safri jiray oo uu halkaan ku hakan jiray.”

Markaan waydiiyay hadday ogyihiin bartuu ahaa qabriga Abuu Lahabأبولهب waxay yiraahdeen inayan farta ku fiiqi karin laakiin uu buurtaan agteeda ahaa: “halkaasoo markuu cudur xun ku dhacay oo uu u dhintay wiilashiisuna ay ka baqeen inay u dhowaadaan ay addoommo ay leeyihiin usoo dhiibeen oo ay buurtaan agteeda ku tuureen ama ku duugeen.”
Waxay intaas iigu dareen in dariiqa buurta hoos mara isagana la yiraahdo “Shaaricu Abuu Lahab**شارع أبو لهب”.**

Kaddib waxaan tegey buurta hoosteeda waxaana ku wareegsan oo ku oodan silig biro ka sameysan sidaad masawirka ku arki kartid. Birahaas dhinocooda kale waxaa ku yaalla khaymad wayn oo aad masawirkeeda arkaysid. Waxaa halkaas ka shaqaynayay nin cawska halkaas ku yaalla iyo dhulkaba wax ka qabanayay. Ninkaas ayaan la hadlay, wuxuuna ahaa nin reer masar**مصر** u dhashay, wuxuuna ii sheegay inay khaymaddaasi tahay xafiisyo ay leedahay shirkad kuwa wax dhisa oo hooteello dhisaysa.

Markaan waydiiyay hadduu yaqaanno bartuu ku oolli jiray qabriga Abuu Lahabأبولهب wuxuu ii sheegay inuusan isagu wali sanad dhmmaysan oo uu dalkaan ku cusub yahay oo uusan aqoon bartuu qabrigu ku oolli jiray, wuxuuna igula taliyay inaan la hadlo ninka ka aadaama “Masjidu Abuu Lahab**مسجد أبو لهب”** oo aan xadaarimta**حضرمي** (waa kuwa ka yimid Xadara Al Mawt**حضرالموت** oo yamaniyiinta**يمن** ah) halkaas jooga wareysto.

Waan ka tegay oo aan xagga masjidka aaday oo ilaa lixdan – toddobaatan mitir u jira. Intaan masjidka usii socday ayaan waxaan dhaagay wuxuu ninku i yiri: “masjidu Abuu Lahab**مسجد أبو لهب** !”

Masjidkaan tegay magaciisuna waa “Masjidu Baa Cuthmaan**مسجد باعثمان.”**
Dariiqa Abuu Lahab**شارع أبولهب** ayaan kor usoo raacay waxaanna arkay nin kale oo suudaanii iila ekaaday oo warshad baabuurta lagu sameeyo sii galaya dharkeedana labbisan. Markaasaan isagana wareystay. Wuxuu u yeeray nin kale oo carab ahaa, isaguna intii oo kale ayuu ii sheegay. Kaddib waxaan aaday xagga masjidka “Baa Cuthmaan**مسجد باعثمان** .”

Halkaas ayaan salaadda maghrib ku tukaday, anigoo doonayay inaan imaamkana la hadlo, wuuse iga hor baxay. Markaan masjidka dibaddiisa imid oo jaranjarada looga dego oo ilaa tobaneeyo tillaabo hoos loogu dego ayaan waxaan arkay oday ka degaya oo socodkuba dhib ku yahay. Waan salaamay, kaddibna aan weydiiyay haddaan wax weydiin karo, isaguna intuu istaagay oo haa yiri. Waan isku sheegay kaddibna aan iri: “waxaa la ii sheegay inuu Abuu Lahabبولهب ratigiisa in badan buurtaan hoosteeda ku xiri jiray: maxay sababtu tahay?”

Wuxuu yiri:
“guri ayuu ku lahaa buurta hoosteeda!”
Waxaan iri:
“oo ma halkaanuu degganaa, Makkana uu guri kale ku lahaa?”
Wuxuu yiri:
“reer Banii Haashim\بني هاشم Makkah\مكة ayay guryo ku lahaayeen, halkaanna guri ayuu ku lahaa, oo halkaan beero ayay ahayd, oo xaafaddaba sidaas ayaa Zaahir\زاهر loogu bixiyay. Makkah\مكة waxaa la yiraahdaa inta buuraha dhexdooda ku jirta oo keli ah. Halkaanu waa waadi ay biyuhu isugu yimaadaan oo beero ayay lahayd. Buurtaan ayaa laga qaaday saddex dalool ama ilaa boqolkiiba boqol dhagaxda guryaha Makkah\مكة lagu dhisay.”
Waxaan iri:
“sababtuna maxay tahay?”
Wuxuu yiri:
“dhagaxa buurtaani aad ayuu u adag yahay, oo ma burburayo sida dhgaxda buuraha kale. Waagaasna shaminto iyo labin/blookeeti ma jirin.”

Waxaan weydiiyay hadday jirto wax looxad ah oo ay ku dhigantahay inuu dariiqaasu yahay dariiqa Abuu Lahab\أبولهب.
Wuxuu yiri:
“ma jirto, mana suurtowdo.”

Wuxuu kaloo ii sheegay, siday ragga kaleba ii sheegeen, in hadda dariiqaas la yiraahdo “Shaaricu Xassaan bin Thaabit\شارع حسان بن ثابت” oo ahaa saxaabiga gabayaaga Nabiga Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam ahaa. Wuxuu i sheegay inuusan aqoon oo farta ku fiiqi karin meeshuu ahaa qabriga Abuu Lahabأبولهب. Kaddibna wuu ii duceeyey inuu Ilaahay cilmiguu i siiyay ii ziyaadiyo.

Maalin Sabti

Maalinta taas ku xigtay ayaan xaafaddaas Abuu Lahabأبولهب kusoo laabtay si aan imaamka masjidkana u wareysto, khaymadda buurta hoosteeda laga dhisayna gadaasheeda xagga buurta xigta oo qaar ka mid ah salka buurta qarinaysa inaan masawirto, ragga khaymaddaas ay xafiisyada u tahayna aan wareysto, ayadoo maalinta jimcaha markaan imid uu albaabka hore quful ku jabsanaa.

Barqadii markaan khaymaddaas imidna albaabka quful ayaa ku jabsaana oo wuu xirnaa. Khaymaddaas warar kala duwan ayaan ka maqlay. Rag waxay yiraahdeen:
“waxaa iska leh shirkad hooteello dhisaysa oo waa xafiisyada injineerradooda.”
Qaar kale waxay yiraahdeen:
“waa shirkad ka mid ah kuwaa waasicinta Xaramka\الحرم wax ka wada.”

Internetkana waxaan ku arkay: “buurta iyo dhulka hareerihiisa ahba waxaa gadatay shirkad dhismooyin ka sameyneysa.”

Markaasaan buurta tafay xoogaa si aan u masawiro khaymadda gadaasheeda iyo buurta salkeeda oo idil: hoos ka fiiri masawirkaas.
Kaddib waxaan tegey Masjidu Baa Cuthmaan**مسجد با عثمان** si aan duhurna ugu tukado, mu'athankana aan u wareysto. Xoogaa kaddibna waxaa yimid ninka aadaamayay. Markaasaan u kacay, aanna salaamay oo isku sheegay, kana codsaday inuu buurtaas iyo xiriirkeeda Abuu Lahab**أبولهب** war iga siiyo.

Odagaas magaciisu waa Shaykh Cuthmaan Cumar Baa Cuthmaan**الشيخ عثمان عمر با عثمان,** waxaanna noqonnay isku da' oo labadeennuba waxaan jirnaa markaas sideed iyo lixdan sano.

Odagu wuxuu ahaa nin waji furan oo bashaash ah, waxaana masjidka markiisa ugu horreysey dhisay awoowihiis Baa Cuthmaan**با عثمان,** wuxuuna ii sheegay qiso aanan hore u maqal, oo kutubbadoo idil aanan ku arag. Wuxuu yiri waxaa ka mid ahaa:

"aaabayaalkeen waxay noo sheegeen oo fac ka fac aan isugu sheegi jirnay oo aan ka maqalnay awoowayaalkeen, waana maqal ee ma ahaa wax kitaab ku qoran, inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam maalin walba soo cumraysan jiray, uuna dariiqaan soo mari jiray. Markaasay Abuu Lahab**أبولهب**, haweentiisa Xammaalatu Al Xadhabi**حمالة الحطب** iyo wiilashooduba (laba wiilashooda ka mid ihi kaddib way islaameen oo asxaabtay ka mid yihiin iyo gabadhooda Durrah bintu Abii Lahab **درة بنت أبي لهب\,** wiilkooda saddexaadna libaax ayaa cunay isagoo gaal ah siduu ugu habaaray Nabi Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam: xasanwali) ay qoryo qodax leh soo uruurin jireen oo markuu Nabigu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam halkaan marayo ay ku kor tuuri jireen. Markay sidaas u dhibeen ayaa waxaa Nabiga Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam loo waxooday inuusan dariiqaas marin ee uu maro dariiqa Riicu Al Kuxli**ريع الكحل**" oo buurta dhineceeda kale mara.
Kaddib haweentaasu ayadoo doonaysa inay Nabiga Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam oo halkaas maraya inay qoryahaas ay tunkeeda ku sidday ku tuurto ayaa qori qoryahaas ka mid ahi wuxuu qabsaday marada luqunta ugu u saarnayd (garbasaarteeda) oo markay qoryuhay tuurtay dheceen ay ayadana hore usii jiteen oo ay ninkeeda ku kor dhacday oo ay halkaas labadooduba ku wada dhinteen.

Boqolkiiba boqol dhagaxda guryaha Makkah**مكة** laga dhisayna waxaa laga qaaday buurtaan oo dhagaxeedu adag yahay. Haddaad buurta dhaladeeda tagtid iyo dhineceeda kaleba waxaad arkaysaa inay daloosho oo dhagaxdeeda lagala baxay. Bartay dukaammadu hadda ku yaalliinna waxay ahaan jirtay beero."
Intaasaan hadda warkiisa kasoo qaadannay.

Raggaas qaarkoodna waxay ii sheegeen in qabrigiisa la dhagax yeeyn jiray sida shaydaanka jamraatka loo tuuro oo kale

Hadana aan in yar ka xusno dhimashada iyo qabriga Abuu Lahab**أبولهب.**

Warka jabka gaalada oo Makkah\مكة gaaray

Ibnu Isxaaq\إبن إسحاق wuxuu yiri:
"Ninka ugu horreeyey oo Makkah**مكة** keenay jaabka gaalada Quraysh**قريش** wuxuu ahaa Al Xaysumaanu bin Cabdu Allaahi Al Khuzaaciyyu**الحيسمان بن عبد الله الخزاعي,** oo markuu yimid ayay ku yiraahdeen:
"Bal noo warran."
Wuxuu yiri:
"Waa la dilay Cutbah bin Rabiicah**عتبة بن ربيعة,** iyo Shaybah bin Rabiicah**شيبة بن ربيعة,** iyo Abuu Al Xakam bin Hishaam**أبو الحكم بن هشام,** iyo Umayyah bin **Khalaf****أمية بن خلف,** iyo Zamcah bin Al Aswad**زمعة بن الأسود,** iyo Nubayh**نبيه** iyo Munabbih**منبه** ilmo Al Xajjaaj**الحجاج,** iyo Abuu Al Bakhtariyyi bin Hishaam**أبو البختري بن هشام**."
Markaasuu siduu u tirinayey madaxda Quraysh**قريش** ayuu Safwaan bin Umayyah **صفوان بن أمية**\ oo Xijriga**الحجر** fadhiya wuxuu yiri:
"Wa Allaahi**والله** hadduu midkaani wax kasayo! Bal aniga iga wareysta."
Markaasey waxay yiraahdeen:
"Safwaan bin Umayyah**صفوان بن أمية** ka warran?"
Wuxu yiri:
"Waa kaasoo Xijriga**الحجر** fadhiya, oo wa Allaahi**والله** waxaan u jeeday marka aabihiis iyo walaalkiis la dilay."

Ibnu Isxaaq**إبن إسحاق** wuxuu yiri:
"Abuu Raafic**أبو رافع,** mawlaha Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri:
"Waxaan ahaa addoon uu leeyahay Al Cabbaas bin Cabdu Al Mudh-dhalib **العباس بن عبد المطلب****,** islaamkuna waa nasoo galay dadka gurigeennaas, oo wuu islaamay Al Cabbaasu**العباس**, wayna islaamtay Ummu Al Fadli**أم الفضل,** aniguna waan islaamay.

Al Cabbaasu**العباس** wuu ka dhawrsanayey tolkiis, wuuna kahanayey inuu khilaafo oo sidaasuu islaamiddiisa u qarinayey, wuxuuna lahaa maal badan oo tolkiis uga kala maqan.

Abuu Lahabna**أبو لهب** Badar**بدر** wuu ka haray, o wuxuu meeshiisa diray Al Caasii bin Hishaam bin Al Mughiirah**العاصي بن هشام بن المغيرة,** oo sidaasey yeeli jireen, oo nin kastoo Badar**بدر** ka harayba nin kaluu meeshiisa diray isaga beddela.

Markaasuu markuu warka laynta ragga Badar**بدر** lagu laayey Makkah**مكة** yimid Ilaahay Abuu Lahab**أبو لهب** wuu hoojiyay oo dulleeyey, annaguna waxaan nafteenna ka dareennay cizzi iyo xoog.
Aniguna waxaan ahaa nin itaal daran, waxaanna samayn jiray fallaarah, kuna afayn jiray khaymadda Zamzam dhexdeeda.

Markaasaa wa Allaahi\والله anigoo qolkaas fadhiya oo fallaarahayga soofeysanaya, agteydana ay fadhido Ummu Al Fadli\أم الفضل, warkaas aan maqalnayna uu na farax geliyay, ayaa waxaa noo yimid Abuu Lahab\أبو لهب oo labadiisa cagood shar la jiidaya.

Markaasuu wuxuu fariistay qolka daraftiisa, dhabarkiisuna uu dhabarkayga xigo. Isagoo sidaas u fadhiya ayay waxay dadku yiraahdeen:
"Waa kanaa Abuu Sufyaan\أبو سفيان (oo uu ibnu Hishaam\إبن هشام yiri magaciisu waa Al Mughiirah\المغيرة) bin Al Xaarith bin Cabdu Al Mudh-dhalib\بن الحارث بن عبد المطلب, oo yimid."

Markaasuu Abuu Lahab\أبو لهب wuxuu ku yiri:
"Aniga ii kaalay, oo wa Allaahi\والله adigaa war hayee."
Markaasuu agtiisa fariistay, dadkuna ay korkiisa soo dhoobteen. Markaasuu Abuu Lahab\أبو لهب wuxuu yiri:
"Wiilka walaalkeeyow, bal dadka amarkooda iiga waraan!"
Wuxuu yiri:
"Wa Allaahi\والله markaan la kulannayba ayaan luqumeheenna siinnay oo aan dhabarka u jeedinnay. Markaasey noo dileen say doonaan, noona qafaasheen siday doonaan. Sidaasoo ay tahay ragga eedeyn mayo, oo waxaan la kulannay rag dhar cadcad xiran oo fardo midabkoodu boor yahay saaran, kuna sugan Samada iyo arliga dhexdooda, oo wa Allaahi\والله ayan cidna dhaafi karin, cid iska celin kartaana ayan jirin."
Markaasaan darafta khaymadda gacanteyda kor ugu qaaday, aanna iri:
"Taasuu wa Allaahi\والله waa Malaa'igta."

Markaasuu Abuu Lahab\أبو لهب intuu gacantiisa kor u qaaday uu wajiga iiga dhuftay, dhufasho xoog leh. Markaasaan ku booday. Markaasuu intuu i qaaday dhulka igu dhuftay, oo uu markaas igu fariistay isagoo isii dilaya. Aniguna waxaan ahaa nin tabar daran.

Markaasey Ummu Fadli\أم الفضل intay kacday ayay waxay soo qaadatay tiir tiirarka khaymadda ka mid ah oo ay madaxa uga dhufatay, dhufasho ay madaxa si xun ugu dillaacisay, waxayna tiri:
"Waad taag darraysatay inuu sayyidkiisu ka maqan yahay."

Dhimashada Abuu Lahab\أبو لهب

Markaasuu fadhiga ka kacay isagoo dullaysan oo uu dhabarka jeedshay, oo wa Allaahi\والله inuusan maalintaas dabadeed noolayn waxaan ahayn toddoba habeen.

Markaas kaddib ayuu Ilaahay ku riday Al Cadasah\العدسة oo dishay.

Al Suhaylii\السهيلي wuxuu yiri:
"Al Dhabarii\الطبراني wuxuu kitaabkiisa taariikhda ku sheegay inay al cadasah\العدسة ahayd nabarro kasoo baxa korka oo ay Carabtu necbeyd oo ka biqi jirtay.

Markaasey markuu ku dhacay Abuu Lahab**أبو لهب** ay wiilashiisu ka carareen, markuu dhintayna ayan maydkiisa saddex maalmood u dhowaan oo aan la duugin. Markaasey wiilashiisu markay ka baqeen in lagu caayo ayay godkiisa qoryo kula riixeen, kaddibna ay dhagax dusha uga tuureen ayagoo ka fog ilaa uu ka qarsoomay."

Yuunis**يونس** wuxuu ibnu Isxaaq**إبن إسحاق** ka wariyay inayan god u qodine, bal ay darbi ku tiiriyeen oo ay darbiga gadaashiisa markaas dhagax uga soo tuureen.

Waxaana la wariyay inay Caa'ishah**عائشة** markay bartaas soo marto ay wajigeeda dabooli jirtay."

Al Balaadii**البلادي** wuxuu yiri:

"Ibnu Jubayr**إبن جبير** wuxuu xusay qabriga Abuu Lahab**أبو لهب** (oo wuuba arkay isagoo la dhagax yeeynayo markuu Al Andalus**الأندلس,** oo maanta ah Spain kasoo xajjiyay sanadka Hijriga ah ee shan boqol iyo sagaal iyo toddobaatanka, kitaabkiisana waxaa la yiraahdaaba Rixlatu ibnu Jubayr**رحلة إبن جبير** ahna Socdaalka ibnu Jubayr**إبن جبير)** iyo haweentiisa sandka Hijriga ah ee shan boqol iyo sagaal iyo toddobaatanka, wuxuuna yiri:

"Waxaa labadooda qabri dul saaran dhagax waaweyn, oo waxaana lagu rajmiyaa dariiqa u dhexeeya Dariiqu Masjidu Al Xaraamy**طريق المسجد الحرام** iyo Al Cumratu**العمرة** oo ah Al Tanciimu**التنعيم** meeshuu ku yaallo Masjidu Caa'ishah**مسجد عائشة,** qiyaas hal mayl ka hor iyo Al Zaahir**الزاهر** hal mayl horteed. Taasu waxaa weeye inay labadaas qabri ku yaallaan salka buurta la yiraahdo Jabalu Abuu Lahab**جبل أبو لهب.** Buurtaas ayaana ilaa dhowaan laga guran jiray dhagaxda Makkah**مكة** wax lagu dhiso."

Waa intaas warka ibnu Jubayr**إبن جبير,** Allaaha u naxariistee.

Riyada Al Cabbaasu\العباس

Al Qasdhalaanii**القسطلاني** iyo Al Zarqaanii**الزرقاني** waxay wariyeen oo yiraahdeen:

"Al Cabbaas bin Cabdu Al Mudh-dhalib**العباس بن عبد المطلب** , Allaha raalli ka noqdee, Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, adeerkiisa uu jeclaa, ayaa wuxuu ku riyooday walaalkiisa Abuu Lahab**أبولهب.**

Al Cabbaas**العباس** wuxuu walaalkiis ku riyooday markay hal sano kasoo wareegatay markuu Abuu Lahab**أبولهب** dhintay, iyo Duullaanka Badarba**بدر** kaddib. (siduu Al Suhaylii**السهيلي** iyo ghayrkiisba u wariyeen).

Markaasuu wuxuu walaalkiis ku yiri:

"Xaalkaaga aad ku sugan tahay bal ka warran?"

Abuu Lahab**أبولهب** wuxuu ugu jawaabay oo uu yiri:

"Naarta dhexdeeda ayaan ku jiraa, laakiin waxaa cathaabta la iga khaffifiyaa habeen walba oo isniin ah, anigoo labadeydaan farood (waana suulka gacantiisa iyo farta ku xigta oo attaxyaadka marka la akhrinayo oo la ashahaadanayo kor loo qaado oo Qiblada xaggeeda loo fiiqo. Labadaas farood waa labada farood oo uu ku fiiqay Thuwaybah**ثويبة** markuu xoreynayey.

Aaminah\آمنة markay dhashay waxay Thuwaybah**ثويبة** u dirtay adeerkiis Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam Abuu Lahab**أبولهب** oo ay ahayd addoon uu leeyahay una sheegto inuu walaalkiis Cabdu Allaahi**عبد الله** wiil u dhashay.

Markaasay Thuwaybah**ثويبة** intay soo kacday ay guriga Abuu Lahab**أبولهب** timid oo ay albaabka kusoo garaacday. Markuu albaabka ka furay ayay waxay ku tiri:
"walaalkaa Cabdu Allaahi**عبد الله** waxaa u dhashay wiil aan isagoo kale Makkah**مكة** lagu arag quruxdiisa oo aad dayaxa moodid" ama hadal sidaas oo kale ah.

Markaasuu aad ugu farxay inay walaalkiisoo isago yar dhintay ay ciribi ka hartay. Markaasuu inta Thuwaybah**ثويبة** labadaas farood ku fiiqay ku yiri:
"xor ayaad tahay" oo sidaas ku xoreeyey.

Dhaqanqaas ayay reer Makkah**مكة** xattaa islaamka hortiis lahaayeen oo qofka wuxuu ku farxo loo sheego sadaquu la bixi jiray) dhexdooda ayaa biyo la iiga soo burqiyaa, oo aan halkaas ka nuugaa. Taasna waxay ku ahaatay, oo la ii siiyey, xoreynta aan Thuwaybata**ثويبة** xoreeyey markay iigu bishaareysey dhalashada Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam iyo nuujinta ay isaga, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, nuujisay". Waxaa Xadiithkaan, ama qaarkiis erayo kale ku wariyay Al Bukhaarii**البخاري** iyo Cabdu Al Razzaaq**عبد الرواق** iyo Al Ismaacilii**الإسماعيلي** iyo Al Sayuudhii**السيوطي** iyo ibnu Al Jawzii**إبن الجوزي** iyo Al Bayhaqii**البيهقي** iyo kuwo kaleba.

Al Imaamu Al Juzarii\الإمام الجزري

Al Zarqaanii**الزرقاني** wuxuu yiri:
"Waxaa riwaayaddaas ka cad in Abuu Lahab**أبولهب** biyahaas cathaabta looga khaffifinayo aan meel kale iyo dibadda looga keenine, ee labadiisa farood dhexdooda looga soo burqiyay, oo intuu nuugo markay uurkiisa galaan uu cathaabtuu ku jiro khaffifin uga helayo.

Biyahaasna Jannada looga keeni mayo, ayadoo, uu Ilaahay Tacaalaa**الله تعالى**, gaalada ka xaaraantimeeyey. Al Imaamu al xaafith abuu al Khayr Shamsu Al Diini ibnu **Al Juzarii** Muxammad bin Muxammad bin Muxammad Al Dimishqiyyi **الإمام الحافظ أبو الخير شمس الدين إبن الجزري محمد بن محمد بن محمد الدمشقي**\, Akhrinta kala duwan ee Quraanka Imaamka ku ah, Xadiithkana xafithay oo korkaba ka haya, dhigayna kutubbada badan oo ay ka mid yihiin kuwa faafiyay Qiraa'aadka tobanka ah oo aan isagoo kale la dhigin, dhashayna, sanadka toddoba boqol iyo kow iyo kontonka Hijriga, dhintayna sideed boqol iyo sadded iyo soddonka, wuxuu yiri:
"Hadduu kaasi yahay kaafirka uu eedeyntiisa Quraan ka soo degay oo looga abaal guday isagoo naarta dhexdeeda ku jira, faraxa uu farxay habeenkuu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam dhashay, muxuu noqonayaa, hadaba, xaalka muslimka muwaxxidka ah oo ummaddiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, ka mid ah, oo ku farxaya mawlidkiisa iyo dhalashadiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, maalkiisana ku bixinaya si qalbi furan intay awooddiisu gaarto,

jacaylka uu Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, u qabo daraadeed, oo uu sadaqooyin bixinayo?"

Allaha daystee al xaafith Shamsu Al Diini Muxammad bin Naasir al Shaamii **الحافظ شمس الجين محمد بن ناصر الشامي**\ wuxuu ka yiri:

1.إذا كان هذا كافر جاء ذمه \\ وتبت يداه في الجحيم مخلدا
2.أتا أنه في يوم الإثنين دائما \\ يخفف عنه للسرور بأحمدا
3.فما ظن بالعبد الذي كان عمره \\ بأحمد مسرورا ومات موحدا

1. Ithaa kaana haathaa kaafirun jaaa thimmuhu/Wa tabbat yadaahu fii Al Jaxiirni mukhladaa
2. Ataa annahu fii yawmi al ithnayni daaiman/Yukhaffafu canhu lil suruuri bi Axmadaa
3. Fa maa thannu bi al cabdi allathii kaana cumuruhu/Bi Axmada masruuran wa maata muwaxxadaa.

Gabayga macnihiisu waxaa weeye:

1. Hadduu kani gaal yahay eedeyntiisu ay timid (Suuratu Tabbat**سورة تبت**)
   labadiisa gacnood ay ku khasaareen Jaxiimo oo ay ku waarayaan.
2. La sheegay in maalin isniin ah si joogto ah oo daa'im ah
   looga khafifflyo farxiddiisa uu ku farxay Axmad dareedeed .
3. Maxaad u maleyneysaa hadaba addoonka cimrigiisoo idil
   Axmad ku farax sanaa, dhintayna isagoo muwaxxad ah?!

Nolosheydaan ku dhaartaye, midkaas muslinka ah oo Axmad**أحمد**, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku faraxsan oo xusaya mawlidkiisa, dhintana isagoo muwaxxad ah oo Ilaahay keligiis caabudaya, abaal marintiisa uu Ilaahayga Kariimka ahi**الله الكريم** siinayo waa inuu deeqdiisa qotada dheer oo ballaaran uu ku geliyaa Jannooyinka nicmada leh, uuna ugu raaxecyo aragtida Wajigiisa Cathiimka ah**وجهه العظيم** Subxaanahu wa Tacaalaa**سبحانه وتعالى**."
Waa intaas warkiisu.

Buurta Abuu Lahab\أبولهب ee Makkah\مكة iyo dukammada iyo warshadaha gaadiidka. Xasanwali 1433H/2011M.

Albaabka khaymadda buurta salkeeda ku taalla, Masjidu Baa Cuthmaan**مسجد با عثمان** iyo burjiga Saacadda wayn ee Kacbada agteeda ah. Dariiqaan waa ”Shaaricu Abuu Lahab**شارع أبو لهب**/Xassaan bin Thaabit**حسان بن ثابت.** Xasanwali 1433H/2011M.

Buurta Jabalu Abii Lahab**جبل أبي لهب** iyo khaymadda salkeeda ka dhisan. Xasanwali 1433H/2011M.

Salka buurta Abuu Lahab**جبل أبي لهب**. Xasanwali 1433H/2011M.

Dr. Xasanwali Sheekh Xuseen Cismaan, DVM
Makkah Al Mukarramah**مكة المكرمة**
Isniin afar iyo labaatanka bisha Muxarram**محرم** ee sanadka kun afar boqol saddex iyo soddon Hijriga, una dhiganta sagaal iyo tobanka Disembar laba kun kow iyo toban Miilaadiga